



Dhaqtar. Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

Mudane Dijon DaCosta, Sr., *Guddoonka Guddiga*  
 Marwo Deirdre P. Pierce, *Guddoomiye Ku xigeen*  
 Marwo Anna Hill  
 Marwo Whitney McGinniss  
 Marwo Allyson Gevertz  
 Marwo Vickie B. Turner  
 Dhaqtar Joyce Morley

## WIXII FASAXID DEGDEG AH

Nofeembar 14, 2024

## Xiriirka:

Donald Porter, *Ed.D.* 678-481-4110  
 Carla Parker 404-734-1717

## **Guddoomiyaha Spears ayaa ku Deeqay \$50,000 oo lagu Taageero Safarada Sayniska Dalxiiska oo Ardayda DeKalb**

(STONE MOUNTAIN, GA)— Gudoomiyaha Gobolka DeKalb Michelle Long Spears ayaa ku sameeyay maalgashi la taaban karo mustaqbalka ardayda deegaanka iyadoo ku deeqday \$50,000 Ururka Waxbarashada Dugsiyada DeKalb, Inc. Hadiyadaan la taaban karo waxay maalgelineysaa safarada sayniska dalxiiska oo dugsiyada ku yaalo Degmada 2, taasoo u suurtoogelineyso ardayda laga yaabo in haddii kale aysan u suurtoogelin inay awoodaan waaya aragnimo noocaas ah oo ee looga qeybgeliyo kobcinta, waxbarashada gacan ku oolka ah ee ka baxsan fasalka.

“La yaabka cajiibkaan sayniska ayaa si dhab ah u noolaada markii ardayda ay ka soo baxaan fasalka oo ay galaan caalamka,” waxaa yiri Guddoomiye Michelle Long Spears. “Taageerida safaaradaan dalxiiska, kaliya ma dabooleyno qarashaadka laakiin waxaan u furaynaa albaabada male awaalka iyo suurtoogalnimada. Canug walba wuxuu u qalma fursada uu ku sahmiyo, ku ogaado, oo lagu dhiirogeliyo caalamka ku haraareysan, iyadoon laga eegin duruufahooda dhaqaale.”

Hogaamiyaha waxbarashada STE(A)M iyo 32 dugsiyo iyo barnaamijyo shahaadeysan, Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) waxay si jooqto ah uga faa'ideysataan u dhawaanshaheeda ee soojiidashada sayniska fasalka koowaad. Tusaale ahaan, dugsiyada hoose iyo dhexe waxay abaabulaan safarada waxbarashada sannadlaha oo ay ku tagaan Xeebta Georgia, halkaasoo ardayda ay ku sahmiyaan sayniska badda iyo deegaanka xeebaha ee goobaha sida Jasiirada Skidaway, Jasiirada Tybee, iyo Jasiirada Jekyll. Waayo aragnimadaan ka duwan waxay xoojisaa waxbarashada fasalka oo waxay badanaa kicisaa xamaasada waarta ee sayniska.

Si kastaba, safarradaan waxay caqabad weyn u keenaan qoysaska daqliga hoose, oo leh qarashaadka isku celceliska oo \$500 canugiiba, oo ay ku jiraan gaadiidka, hoyga, iyo cuntada, gaar ahaan kuwa ay sida xun u saameysay cudurka safmarka ee COVID-19.

“Ururka Waxbarashada Dugsiyada DeKalb, Inc. waxay ku faraxsanyihiin iskaashigaan ay la yeesheen Guddoomiye Michelle Long Spears, "waxaa yiri Thurman Green, III, Agaasimaha Fullinta Ururka. “Deeqdaan waxay ka badantahay kaliya taageerada dhaqaale. Tan waxay u tahay halbowle nololeed muhiim u ah arday badan oo laga yaabo haddii kale inay seegaan waaya aragnimadaan waxbarashada gaarka ah. Iyadoo lakala qeybinayo caqabadaha dhaqaale, waxaan ku xoojineynaa ardayda inay gaaraan filashadooda buuxdo iyo kobcinta jaceylka qoto dheer oo sayniska oo si macquul ah u qaabeeynayo mustaqbalkooda qaabab kaliya aan qiyaasi karno.”

Dugsiyada DCSD ayaa u qalmo maalgelintaan oo ay ku jiraan:

- Dugsiga Hoose ee Ashford Park
- Dugsiga Hoose Briar Vistal
- Dugsiga Coralwood

- Rugta Dugsiga Hoose ee Sare ee Dunwoody/Dugsiga Hoose Cary Reynolds
- Dugsiga Hoose Fernbank
- Rugta Hoose ee Globe Academy
- Dugsiga Bulshada Caalamiga ah
- Dugsiga Hoose Laurel Ridge
- Dugsiga Hoose John Robert Lewis
- Dugsiga Hoose ee Montclair
- Dugsiga Hoose Montgomery
- Dugsiga Hoose Oak Grove
- Dugsiga Hoose Sagamore Hills
- Dugsiga Hoose Woodward
- Dugsiga Dhexe Druid Hills
- Rugta Sare ee Globe Academy
- Dugsiga Kittredge Magnet
- Path Academy

Deeqda waa deeq hal jeer ah, iyo lacagaha loo qoondeynayo Sebteembar 2026.

“Maalgashigaan ugu horeeyo waxay wadada u xeereysaa bulsho xoogan, ganacsiyo, iyo iskaashi waxbarasho. Hadiyad ah \$50,000 oo ka timid Guddoomiye Michelle Long Spears ayaa tusaale u ah aaminaada iyo kalsoonida in Guddoomiye Long Spears ku leeyahay ogaanshaha in Ururka si firfircoon uga shaqeynayo wanaajinta natiijooyinka tacliinta iyo gaarista wanaagsan oo dhammaan ardayda Dugsiga Gobolka DeKalb,” waxaa yiri Patricia Smith, Guddoonka Guddiga ee Ururka Waxbarashada Dugsiyada DeKalb, Inc.

Ururka Waxbarashada Dugsiyada DeKalb, Inc. waa urur 501(c)(3) oo abuurto iskaashiyo waxtar leh oo lagu kobciyo ardayda si fiican u dhisan oo xoojiyo waxbarida heerka sare. Wixii warbixin dheeraad ah ee lagu sii wadayo Ururka, fadlan booqo websaydka [HALKAAN](#) ama la soo xiriir Mudane Thurman Green, III, Agaasimaha Fullinta ee Ururka Waxbarashada Dugsiyada DeKalb, Inc. i-meel ahaan [thurman\\_green@dekalbschoolsga.org](mailto:thurman_green@dekalbschoolsga.org) ama taleefon ahaan oo (404) 310-3562.

XXX